

I Wasaaradda Waxbarashada ee NSW

**Waxyaalaha laga filayo ee COVID-19 safe inta lagu jiray
baaritaanada qoran ee HSC**

Macluumaadkan wuxuu caawin doonaa ardeydu inay fahmaan qorshaha COVID-19 safe oo jira markay ka qaybgelayaan imtixaanka HSC. Amaanka iyo fiyoobaanta ardeyda iyo shaqaalaha imaanshahooda aad ayuu muhiim noogu ahaa anaga sidoo kale waxaan weydiinaynaa dhammaan ardeydu inay la shaqeeyaan nidaamyadaan wakhtiyadoo dhan.

Iskiriingareynta ardeyda leh astaamaha

- Ardeydu waa inaysan tegin baaritaanka haddii aysan caafimaad qabin
- Ardeyda waxaa la weydiin doonaa markay yimaadaan haddii ay qabaan wax calaamado hargabka oo kale ah ama haddii ay tahay inay galaan isgooni yelid sida waafaqsan tilmaamaha NSW Health.
- Ardeyda muujinaya calaamadaha hargabka oo kale ah ama sheega inaysan caafimaad qabin waxaa loo sheegi doonaa inay dugsiga ka baxaan oo ay sameeyaan baaritaanka COVID-19.
- Ardeyda leh taariikh caafimaad ama jiro la yaqaan oo laga yaabo inay u muuqato inay leedahay astaamaha COVID-19 waa inay hadda qorsheynayaan oo ay la hadlaan dhakhtarkooda (GP). GP -ga ayaa ku siin kara qoraal hubaal ah-tusaale, ardeygu wuxuu u muujiyaa astaamaha si caadiyan ah.

Astaamaha hargabka oo kale ah

Astaamaha hargabka oo kale ah waxaa ka mid ah xumad, qufac, cune xannuun, neef qabasho, dhadhanka oo kaa luma iyo urka oo kaa luma. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan astaamaha COVID-19 waxaa laga heli karaa ka [NSW Health website](#).

Ardeyda muujineysa xitaa astaamaha hargabka oo kale ah waa inay isla markiiba tagaan oo aysan soo noqon ilaa ay helaan baaritaanka COVID-19 oo aan waxba laga helin oo aan lahayn wax astaamo ah.

Dhakhso u dabagal natiijada baaritaanka COVID-19

Ardeyda HSC waxay dhakhso u daba geli karaan natiijadooda baaritaanka COVID-19:

Si ay tan u sameeyaan waa inay:

- sheegaan inay yihiin ardeyda HSC markay baaritaanka sameynayaan
- hubiyaan in dhakhtarka ama kalkaalisada sameynaysa baaritaanku inay ku calaamadeeyaan soo gudbinta “degdeg” – HSC’
- isgooni yeelaan ilaa laga helayo natiijo aan waxba laga helin
- tusaan dugsigooda natiijada inaan waxba laga helin
- wac lambarka xiriirka ee lagaa siiyey rugta caafimaadka haddii aan natiijada lagu helin 36 saacadood gudahood.

Yareynta khatarta isugudbinta

- Ardeydu waa inay dhaqaan gacmahooda ama ay isticmaalaan jeermis dile ka hor intaysan imtixaanka bilaabin.
- Ilaaliyaan waxqabad nadaafadeed oo wanaagsan oo shakhsiyeed inta lagu jiro imtixaanka oo ay ku jiraan daboolida qufaca ama hindhisada iyagoo ku qufacaya ama hindhisaya suxulkooda ama tishuu, tuurayana tishuuga imtixaanku markuu dhammaado.
- Iska ilaali gacan qaadista ama hab siinta ardeyda kale maalmaha imtixaanka.
- Alaabta nadaafada oo laga heli doono dhammaan goobaha imtixaanka
 - Jeermi dile
 - Masaxayaal
- Ardeyga waxaa laga yaabaa inuu masaxo miiskiisa ka hor intaysan bilaabin imtixaankooda haddii ay doortaan.
- Ardeydu waa inaysan dhexgelin kooxo balaaran ka xor iyo ka dib imtixaanka.
- Qolalka imtixaanka maalin walba waa la nadiifin doonaa.

Nidaamka imaanshaha iyo saxiixida

- Ardeydu waa inay yimaadaan waxaan ka badneyn 20 daqiiqo imtixaanka oo ay isaga xaadiriyaan si toos ah qolka imtixaanka loogu talagalay si loo iskiriingareeyo oo ay u saxiixaan.
- Ardeyda waxaa la weydiin doonaa inay saxiixaan warqada imaanshaha oo caddeynaysa imaanshaha imtixaanka, iyagoo bixinaya faahfaahinta xiriirka iyo inaysan qabin astaamo hargabka oo kale ah.

Goobaha imtixaanka ee kale

Dugsigaagu wuxuu ogaaday goobo kale oo imtixaan lacala haddii aan imtixaanku ka dhici karin goobta loo qorsheeyey. Macluumaadkan waxaa lagugu siin doonaa jadwalkaaga imtixaanka shakhsiyeed si uu diyaar ugu ahaado isla wakhti gaaban gudahiis lacala haddii loo baahdo.

Tani waa xoojin kaliya ardeyduna waa inay yimaadaan goobtii la qorsheeyey ilaa uu dugsigu u sheego mooye. Ha tegin goobta kale ee la soo jeediyey haddii uusan dugsigu kuu sheegin inaad sidaas sameysid.

Kiisaska la xaqiijiyey ee COVID-19

Haddii, inta lagu jiro xiliga imtixaanka, dugsiga ay u sheegto NSW Health inuu jiro kiis la xaqiijiyey oo ah COVID-19 oo saameyn doona dugsiga, qorshe ayaa meel yaal si loo yareeyo carqalada meeshii suurtagal ah. Waxaa laga yaabaa inuu dugsigu kugula taliyo maalinta ka horeysa in imtixaanka loo wareejin doono goob kale oo ku faahfaahsan jadwalkaaga ama waxaa laga yaabaa in imtixaanka la kansalo.

Jiro/khaladaad

Ardeyda aan iman imtixaanka lahaanshaha astaamo awgood, ama kuwaas dib loo celiyey iskiriingareynta awgeed waxay xaq u yeelan doonaan dalabka jiro/khaladaad. Dugsigaaga ayaa kaa caawin doona nidaamkan meeshii loo baahdo.

Adeega Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsigaaga. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan ka wac Adeega Turjubaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. Adeegani wuxuu noqon doonaa mid bilaash kuu ah adiga.